

Burburkii dimoqraadiyada soomaaliya

Hordhac

*Magaca eebbe ayaan ku bilabaayanaa ee
naxariista naxriis guud & mid gaarba,*

Kaddib:

*Buugan oo la magac baxey burburkii
dimoqoraadiyada soomaaliya waxaan
jeclahey in aan uga faaiideyo umada
soomaaliyeed gaar ahaan dhalinta maanta
iyo kuwa berito si ay xog dheeraad ah uga
helaan heerarkii ay soo martay
dimoqoraadiyada soomaaliya iyo sida ay ku
burburtey iyo iney soomaaliya soo martey
dimoqoraadiyad lagu deyan karo sanadihii
1960-1969 taasi oo aan ku faahfaahin doono
buugan anigoo cadeynaya oo qeexaya sidey
u burburtey dimoqoradiyadii iyo
qaranimadii soomaaliya , waxaan jeclahey
in aan ilaalyo sharafta buugan, ma doonayo
in aan shakhsi wax ugu dhimo laakiin
waxaan rabaa in maamulo lasoo maray aan*

Burburkii dimoqraadiyada soomaaliya

**BURBURKII
DIMOQORAADIYADA
SOOMAALIYA**



W.Q

Xassan Xayle Tooxow

2012

مخطوطات
مجمع خيبر

*Ma banaana in la daabacdo iyadoon idan laga haysan
qoraha buugga:*

Wixi faahfaahin waxaad kuso gudbin kartaa

Tohow1960@hotmail.com

00966 567189442

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

waxaana saldhig u ah oo looga gudbi karaa in la ilaaliyo dastuurka iyo wax kasta oo lagu hishiyo raalina la isaga yahey, si loo ilaaliyo qaranimada aan cidi gaar u laheyn, waa in maamul kasta oo jecel in uu umadaan hogaamiyo in uusan ku dhicin wixii shaley dumiyey qaranimada oo qatarta geliyey midnimada soomaaliyeed uuna ogaado masuulku in uu shaqaale u yahey umadan uu wax ku noqdey uusana is moodin in uu dadka wax dheer yahey, waxaadna wax ku tahey calanka ku horyaal oo umadu wada leedahey,

3)- tariikh kooban oo ku saabsan soomaaliya sida ay ahyed tariikhdii u dhexeysay 1943-1954.

4)- sidey noqtey soomaaliya 1954-1960

5)- Inqiilaabkii 25kii sarkaal 21 oct 1969. & marxaladahi ka dambeyay.

6)

Ugu dabeyn mahad alle kadib waxaan mahad uso jeedin asaxaabtayada iga caawisay soo saarka buuggaan, si gaar ah, Mr. Mahamuud Ahmed Hassan

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

oga hadlo taariikh ahaan iyo xogogaal dhab ah, buugaan waxaa igu kalifey markaan arkey dhalinta maanta oo inta badan aan ogeyn wixii kalifey dhibaataada ay ku jiraan taas oo u horseedey mustaqbal xumo, taariikhda in la qoro waa fiicantahay si khibrad looga qaato lakiin waa iney noqoto wax sugan oo si dhab ah u dhacey si umadu uga faaiideysato.

Hadaan dib ugu noqdo qodobada buugga & dhacdooyinka & tariikhda qaranimadi burburtay ee somaaliya ee aan rajeynayo inaan kuso badhigo baaristooda buggaan waxa ay noqon doontaa sida hoose ku xusan buugaan wuxuu ka hadlayaa taariikhdii u dhexeysey 1943-1991

1)- heerarkii lasoo marey iyo dhacdooyinkii dhacey iyo wixii sababey.

2)- waxaan kale oo jeclahey in aan ku faahfaahiyo qaladaadkii la galey si aan dib loogu noqon oo ay dersi ugu noqoto shacabka iyo masuuliyiintiisa.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

1-SOMALIYA SIDEY AHEYD 1943-1954.

*1-. Dadka soomalida ah waxey u badnayeen
dad xoolo dhaqato ah iyo beeraleey
waqtigaas oo dunidu inta badan gumeysi ka
jiray ayna yaraayeen wax xor ah
somaliduna umadahaas ayeey wax la qabeen
waxeyna u kala qeybsaneed 5qeybood,
bariga iyo koonfurta iyo bartamaha talyani
ayaa heystey, waqooyiga ingiriis ayaa
heystey, jabuuti faransiis ayaa heystey
koonfur galbeed Kenya ayaa heysatay,
soomali galbeed itoobiya ayaa heysatey
hadana waxey ahaayeen dad iska war haya
inkastoo isgaarsiinta maanta jirta aysan
jirin hadana niyad wanaag iyo wadaninimo
ayaa jirtey iyo is jaceeyl waxeeyna
lahaayeen hal aragti oo ah siddee ayaad oga
baxdaan gumeysigaan iyadoo taariikhda
aan soo qatey ay ka horeeyeen halgano
hadana mudada aan soo qatey 1943
waxaad moodaa in uu sii xoogsadey isku*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Mr.Ahmed Said Gurbe,

Mr. Osman Said Osman

*Waxaan ku soo gabagbeynayaa hordhaca
buugaan in umada soomaaliyeed meel kasta
ay joogaan ay is cafiyaan isku tanaasulaan
una soo jeestaan iney wax la qeybsadaan
dunida oo ilaah ugu tala galey in bini
aadanku camiro taariikhna uga tago.*

W.Q

Xassan Xayle Tooxow

Sunday, February 19, 2012

Jeddah Saudi Arabia,

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*markii ay taariikhdu aheyd 1943 waxaa
biloowdey guux xoriyad doon ah oo ku
saleysan nidaam xisbi ah, waxaana is
urursadey dhalinyaro yaryar oo si qarsoodi
ah ku bilaabay xisbi ay u baxsheen S.Y.L.
ama(LEGO)*

Dhalinyaradi SYL



Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*xirka gobolada soomaliya oo dhan iyo
nidaam xisbi ah in uu biloowdey,
waxyaalahaas waxaa suura geliyey
somalida oo aheyd dad wada muslim ah iyo
iyda oo ay soo baxeen culimo badan oo meel
walba gaarsiiyey diinta islaamka dadkuna
iyagaa saacidi jirey culimada si ey
ubadkooda u baraan diinta islaamka,
deegaan ama tuulo waliba dadka degan
iyaga is xilqami jirey sameysan jirey
misaajid ama mowlac ay ku tukadaan iyo
dugsi quraan oo ilmohooda lagu baro
quraanka mana aheyn mid la isku riixriixo
laakiin qof waliba awoodiisa ayuu bixin
jirey taasi waxey keentey in ninka culimida
ah meeshuu tago laga soo dhoweeyo xoolo
la siiyo taasina wuxuu ku heley jaceeylka loo
hayo diinta islaamka taasina waxey sii
kordhisey isku xirka soomaalida meel kasta
ooy joogaan,*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Sidaan horey usoo sheegay syl oo keli ah ma aheyn dadkii uso halgamay xoriyada ummada somaaliyeed oo halagano ka horreeyay ayaa jiray sida, halagankii siyad muxammed cabdulle xasan & halagankii axmed gurey, waxaa sido kale iyana xusid mudan xiligii SYL dadki iyaguna halganka ku jiray sida xisbigii dhalinyarada somaaliyeed ee laga aasasay waqooyiga [SNL] kaas oo isna la mabd'a ahaa SYL,

Waxa iyagana xusid mudan gabdhihii soomaliyeed ee halaganka ka qeyb galay oo safka kula jirey dhalinyaradii halganka, gabdhaha soomliyeed sida ay tariikhdu xustay waxay ahayeen matoorki hawalaha dhaqdhaqaaqa xoriyad doonka dhaqaajin jirey mararka qaarkoodna meelaha halista ah raga qaarkiis oga horeyn jirey, waxay ahayeen gabdhaha soomliyeed ee xiligaas halganka ka qeybgalay kuwa geesinimo iyo deeqsinimo intaba u hura ummadooda, mararka qaarkood oo dhalinyaradu u baahato taakuleyn waxa ay iibin jireen

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Tariikhda soomliya marwalba oo la xuso dhalinyaradii [SYL] waxay ka yahiin hormuud waayo waxa ay ahaayeen furahii xornimada ummada somaaliyeed, dhalinyaradi xisbiga syl ee ummada somaaliyeed u halagmay waxay ka koobanaayeen oo madax u ahaa xisbiga 13 xubin,

- 1. Yaasiin Xaaji Cusmaan*
- 2. Daahir Xaaji Cusmaan*
- 3. Cali Xasan Maxamuud*
- 4. Siidii Xirsi Nuur*
- 5. Maxamed Cali Nuur*
- 6. Maxamed Faarax Hilowle*
- 7. Cusmaan Geedi Raage*
- 8. Dheere Xaaji Dheere*
- 9. Maxamed Cusmaan Baarba*
- 10. Huudow Macallin Cabdulle*
- 11. Xaaji Maxamed Xuseen*
- 12. Cabdulqaadir Saqaawediin*
- 13. Xaajji Maxamed Cabdullaahi (Xayeesi)*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*Ogow dhalinyaradaas dalkooda &
dadkooda u halgmay si ay oga xoreyen
gumaysiga badankood aqoon sare ma
laheyn qaar kamid ahna waxba ma qori
jiren waxna am akhrin jirin!*

*Maanta dhalinyaro badan oo soomaliyeed
oo aqoon heer sare leh ayaa jira xaaladuna
waa ay ka daran tahay tii hore.*

*Xisbigaan markii ugu horeysey wuxuu ka
bilowdey magaalada muqdisho waxeyna
isugu tegi jireen guri yar, asaasayaashii
waxey ahaayeen 13 toban dhalinyaro ah,
mudo yar kadibna (LEGO) waxey gaartey
soomaliya oo dhan iyo gudaha itoobiya
dhulka soomalidu leedahey dadku waxey
bilaabeen dhaqdhaqaaq gobanimo dadkana
niyadoodu aad bey u kacdey waxeyna diyaar
u ahaayeen dhimasho, 5 oct 1949kii waxaa
dhacdey ha noolato ama dhagax tuurkii oo
dad badan oo soomaliyeed ay ka qeyb
qaateen waxaana kale oo dadka niyada u sii
dhisey markii laga soo laabtey dagaalkii
2aad ee dunida oo dhamaadey 1945,*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*dahabkooda si ay u taakuleyaan halganka,
sido kale sida raga ayey iyagoo halgamaya
dhiman jireen oo xaawo taako ayaa ka
marag ah allaha u naxariistee,*

*Dhalinyaradii horseeday xoryiada ay
ummada somaaliyeed qadatay 1960 si ay
tusalee wanaagsan oga qaateen
dhalinyarada maanta & kuwa birto waxa is
weydiin mudan maxay ku muteen guulahaa
ay u so hoyiyeen ummadooda? guulo badan
ayey SYL gaartay mudadi ay halganka ku
jireen balse waxaa ugu muhiimsan oo
maanta dhalinyarada joogta ay kaga dayen
karaan waa sidii fududeyd ee ay mabda'oodi
ku salaysanaa wadinyada iyo midnimada
ugu dhex faaafiyeen ummada somaaliyeed
kadibna ay taanasul u sameyen
walalahooda kale.*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya
2-.SIDEE NOQOTEY SOOMALIYA
1954—1960.

*1954 bishii oct 14dii waxaa lasaarey calan
Somali leedahay oo ku meelgaar ah,
waxaana haboon in la xuso calanka quruxda
badan ninkii somaliga ahaa ee fikradiisa
lahaa waxaana la oran jirey alaha u
naxariistee (maxamed cawaale liibaan)*

Max'd cawale libaan



Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*markaas oo dad askar u ahaa gumeystaha
ay dalka ku soo noqdeen iyagoo wata waaya
aragnimo markaas ayaa kuwii wadaninimo
ku jirtey dadkooda la shaqeyeen una
faaideyeen.*

*Xisbigii leego wuu sii xoogeystey waxaana
laga furey soomaliya oo dhan dad badan
ayaa ku biirey dadna waa ay lu gooyn
jireen waana leyska ilaalin jirey, weligeed
wuu jirey lagu shaqeyste ilaa hadana wuu
jiraa laakiin meel ma gaarayaan wadaniga
ayaa guuleysanaya ugu dambeysta. waxey
socoto waxaa soo dhowaatey xukun hoosaad
loo ogolaado soomalida markaas oo la
arkey in dadkaas wax fahmeen laguna sii
wadi karin gumeysi laakiin la gaarsiiyo
xoriyo waxna la baro, waxaa jirey booliis la
asaasey 1950 kaas oo u shaqeynayey
gumeysiga laakiin markii la heley xukun
hoosaad wuxuu noqdey booliis somaliyeed,
waxaana 14kii oct 1954tii la saarey calan
Somali ah.*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

r/wasaare: cabdulaahi ciise



Waxqabadka wanaagsan ayaa fiican in uu taariikhda kuu galo si aad magac oga tagtid umaduna kuugu deyato, r/wasaare c/laahi ciise dowlad ayuu soo dhisey halgankiina meeshii ayuu kasii socdey, somalida waxey

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

markii la maqley in naloo sameynaayo dowlad kumeel gaar ah oo na gaarsiineysa dowlad soomaaliyeed oo xor ah ayaa dadku farxad iyo ciyaaro meel kasta isugu soo baxeen waxaana dowladaas r/wasaare ka noqdey c/laahi ciise oo nin dhalinyaro ahaa oo aan ku jirin 13kii lego asaastey taasi waxey guul u tahey 13kii dhalinyaro oo aan damac qaadin tanaasul sameyey loona baahan yahey in lagu deydo, xil la qabto macna ma sameynaayo wadanka oo wax loo qabto ayaa muhim ah.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Maxamud yusuf muure



Dowladii c\laahi ciise iyo arimaha xoriyada soomaliya oo la sugayey dadkun , markan xoriyadii wey soo dhowaatey baarlamaankii waa la diyaariyey nidaamkii dowladnimo ayaa la bilaabey oo ay ugu horeysey in shaqaalahad dowlada wax la baro iyo in dhalinyarada waxbarasho dibada loogu diro.mudadii wey soo dhowaatey wadanku wuxuu lahaa booliis oo keliya waxaa la

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

ogaayeen inkastoo xukun hoosaad la siiyey in marna gumeysigu dhabar jebin uusan deyneyn, isjaceylka dadku marwalba waa sii kordhayey, bal tusaalahan fiira gaar ah u yeesha.

Mar uu r\wasaare c\laahi ciise uu u dhoofi rabey dalka dibadiisa si uu uga qeyb galo shir ayaa waxaa la damcey in talaal sun ah lagu dhufto laakiin markii xog la heley waxaa bedelkiisii galey wadani ay isku eekaayeen waxa muwadaankaas layiraahada magaciisa maxamed yusuf muure oo isugu ku tala galey in isaga dhinto intii uu dhiman lahaa masuulkaas oo waqtigaa shaqo badan u taalo! mudane maxamuud yusuf muure amar alle ma uusan dhiman balse caafimaad kiisii ayey irbadii wax u dhintey oo wuxuu noqdey nin aan dhalin, bal isu eeg heerka maalintaas iyo manta faraqa u dhexeya, ogow dalku weli muwaadin waa u baahan yahey xaaladuna meeshii waa ka xun tahey,

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Jen: da'uud cabdulle xirsi



Booliiska soomaliya waxaa taliye looga dhigey janaraal maxamed abshir oo noqdey janankii ugu horeeyey booliiska soomaaliya, Jen: maxamed abshir



Mogadishu, 1964: Farer helped train the Somali National Police Force. Here, being congratulated by Mohamed Abshir, Commanding General of the National Police.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

sameyey booliiskii qaar ka mid ah ayaa laga dhigey milateri.

12kii abril 1960 iyadoo mudadii xoriyada ka dhiman tahey 2 bilood iyo 19 maalmood ayaa la asaasey milateriga soomaaliya waxaana taliye looga dhigey janaraal daa,uud cabdulle oo noqdey janaraakii xooga dalka soo maliya ugu horeyey.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya
3- ISRAACII KONFUR IYO WAQOOYI.

1- 1960kii waxaa laga taagay koonfurta soomaaliya calanka soomaliya, caasimada soomaaliya waxey noqotey muqdisho isla habeenkaas waxaa lagu dhawaaqey midowga waqooyi iyo koonfur. halkaas waxaa ka biloowdey neecoowdii xoriyada waxaana nasiib u yeeshey in uu noqdo madaxweynihii ugu horeyey ee soomaliya Aadan cabdule cismaan allaha u naxariisto,

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

halkaas waxaa ku dhameystirmey nidaamkii dowladnimo iyada ay dhineyd doorashadii madaxweynaha iyo 1 luulyo oo calanka la saaro, halkaas waxaa ku dhamaatey doowlad hoosaadkii uu hogaaminayey c\laahi ciisi waxaa muddo ka dib lasoo gaarey xoriyadii 26-6-1960 ayaa la taagey calan soomaaliyeed oo xor ah waxaana laga taagey gobolada waqooyi oo dhan waxaana hogaamiye ka noqdey maxamed ibrahim cigaal ilaah ha u naxariisto isaga iyo hogaamiyayaashii waqooyi xiligaas waxey noqdeen muwaadiniin niyad fiican, suurta geliyeyna in waqooyi iyo koonfur midoobaan.

Maxamed Ibrahim cigaal



Burburkii dimoqraadiyada somaaliya
r/wasaare c/rashiid cali



*Wuxuuna soo magacaabay c/rashiid dawlad
 ka kooban 13 xubnood oo wasiirro ah,
 waxayna kala ahaayeen*

<i>Magaca</i>	<i>Wasaarada</i>
---------------	------------------

- 1: Cabdi xassan buuni, r/wasaare ku xigeen*
- 2: C/laahi ciise maxamuud..... arimaha
dibada*
- 3: C/risaaq xaaji xuseen. arimaha
gudaha*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya
Madex: aadan cabdile cisman



*waxaana loo dhaariyey 1 sano oo kumeel
 gaar ah, xiligaas wadanku wuxuu lahaa
 barlamaan wuxuuna aadan cabdile u
 magacaabey r/wasaare c/rashiid cali
 sharmaarke oo noqdey r/wasaaririhii ugu
 horeyey soomaaliya oo xor ah*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

si aan oga baxno kumeel gaar, waxaana ku tartamay aadan cabdule oo madaxwayne kumeel gaar soo maray iyo shekh cali jimcaale oo ahaa wasiirkii cafimaadka waxaana ku guuleystay aadan cabdule cismaan oo markale noqday madaxwaynahii soomaliya shircigeedu dhanyahay, waxaana loo dhaariyay mudo 6 sano ah, wuxuuna markale magacaabay r.wasaare c/rashiid cali sharm'arke, c/rashiid wuxuu markale soo magacaabay gole wasiiro oo ka kooban 11 xubnood, oo kuwii kumeel gaarka ahaa u badnaa intooda badanyed wasaaradahoodi lagu so celiyay, kuwa yarna xilkoodi waayeen, 20kii july 1961kii wuxu r/wasaaraha si rasmi ah ugu dhawaaqay liiskii golaha wasiirada oo kala ah

<i>Magaca</i>	<i>Wasaarada</i>
---------------	------------------

- 1: C/laahi cise max'ud.....Dibada*
- 2: C/risaq xaji xusen.....Arimaha gudaha*
- 3: Sh cali ismaciil.....Difaaca*
- 4: C/qadir soobe.....Maaliyada*
- 5: Max'd ibrahiim cigaal..... Taccliinta*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

- 4: Max'd ibrahiim cigaal..... difaaca*
- 5: C/qaadir soobe..... maaliyada*
- 6: Sh cali jimcaale..... cafimaadka*
- 7: Cali jaamac garaad..... taccliinta,*
- 8: Sh c/lle warsame ganacsiga*
- 9: Cali max'd hiraabe..... warfaafinta*
- 10: Max'ud axmed maxamed. cadaalada*
- 11: C/nur max'd xusen...arimaha bulshada&isgaarsiinta*
- 12: Axmed xaaji ducale... beeraha*
- 13: cisman max'd ibrahim.....arimaha soomalida*

Dawladaas oo kumeel gaar ahyed waxay soo diyaarineyey say dastuurkii dalka, runtiina way ku guuleysteen mudo hal sano ah iney kuso diyaariyaan, waxaaana gobalada dalka oo dhan la gaarsiiyay sidii loogu codeyn lahaa dastuurka, bishii july 1961dii ayaa loo codeyay dastuurkii soomaliya ku dhaqmi lahyed isla bishaana waxaa dhacday doorashadii madaxwaynaha

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*sonkorta ee jawhar oo la aasaasay 1962kii,
Iyadoo dhaqaalah dalka kor usoo kacay oo
aan afar jirsanay ayaa dagaal inala kashay
dawlada itoobiya 1964kii oo ahyed
boqortooyo da'a weyn hadana niyad sami
dadka iyo xooga dalka ayaan isaga
caabinay, waxyna ciidamada xooga dalka
muteys teen abaal marino guud, wuxuuna
madaxwaynahe aadan cabdule iyo
taliyihiiisa ciidamada jenraal dauud cabdule
bilad sharafayo siiyeen*

1: korneel c\llahi yusuf axmed

2: jenaraal Salaad gabeyre kediye

3: koroneyl cilmi nuur tarey

4: fanaanad saynab xaaji baxsan

5: mustafa xaaji nuur oo wariye ahaa

*Taasi waxey ku tusineysaa dhiirigalinta ku
deyashada leh,*

*Dagaalkaas oo aan guulo xoog leh kaso
hoyiney hadana wuxuu nugu reebay khilaaf
dhex marey madaxda sare waayo r/wasaare
c/rashiid markuu arkay in mareekanku u*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

6: Cali jamac garaad.....Beeraha

7: Sh cali jimcaale..... Cafimaadka

*8: Sh c/llaahi max'ud.....Warshadaha &
ganacsiga*

9: Cali max'd hiraabe.....Warfaafinta

10: Max'uud max'd Cadaalada

*11: C/nur max'd.....Arimaha bulshada
& isgaarsiinta*

*Halkaasna waxaa ku dhamestirmay
nidaamkii dawladnimo oo kaamil ah oo
sharcigeedi u dhanyahay waxaana
bilaabatay in calaamka xiriir nala
yeeshaan, dawlado badana safaarado
keensadeen inkastoo qaar joogen oo ay
yimadeen 1960kii, hadana 1961kii waxaan
noqnay dawlad haysata kalsoonida
shacabka oo barlamaankooda matala dadka
iyo dawladana way isku xirnaayeen inkastoo
wagaas aqoontu iska yareed dadku hadana
niyad ayey hayeen iney wadankooda u
shaqeyaan waxna bartaan, dawladana
dhaqaale badan ma heysan inkatoo
mashruucyo bilowdeen sida warshada*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

r/wasaare, c/risaq xaji xuseen



*- 1967 waxaa dhacdey doorashadii
madaxweynaha oo u dhacdey si fiican
baarlamaanka soomaliyedna muujiyeen
dimoqoradiyad dhab ah waxaana
doorashadaa ku guuleystey mudane
c/rashiid cali sharm, arke allaha u
naxariisto oo noqdey madaxweynihii 2aad
ee soomaliya mudane aadan cabdulle alaha
u naxariistee wuxuu xilkii ku wareejiyey
c/rashiid si sharaf leh wuxuuna noqdey
madaxweynihii u horeyey afrika oo si
dimoqradi ah ku wareejiyey xukunkii
waxayna taasi dhaxal siisey in uu*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*janjeero dhinaca itoobiya ayuu wuxuu
go'aansaday in uu ruushka oo aan xiriir la
laheyn 1961kii in uu u raad sado saanada
malitari iyo tababarka ciidamada si uu
nooga caawiyo ayuu kala soo hishiiyay inuu
tagay 1964tii, taasi kuma uusan qancin
madaxwayne aaden cabudle cisman oo u
janjeeray dhinaca reer galbeedka, taasi
waxay keentay in waqtigii dawlada
kalsoonida weydiisan lahyed baarlamaanka
ay soo dhaweyd, taasoo madaxwaynuhu ka
biyo diiday in lasoo celiyo c/rashiid cali
markale lana siiyo codka barlamanka balse
baarlamaanku waxa ay tageersanayeen
r/wasaaraha, arinkaas madaxwaynuhu muu
aqbalin waxayna kaliftay in madaxwaynaha
uu soo magacaabo r/wasaare kale 1964tii
wuxuuna noqday c/risaaq xaaji xuseen,*

*Kadib dood badan dhex martay
baarlamaanka iyo madaxwaynaha ugu
dabneyntii c/risaaq ayaa la magaacabay,*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

masuuliyiintii koonfurta somaliya kuna qancey in uu noqdo wasiirka difaaca ee u horeyey somaliya oo xor ah. 1967 cigaal wuxuu noqdey allaha u naxariistee r\wasaarihii 3aad oo somaliya oo xor ah, halkaas waxaa ka sii socdey nidaamkii barlamaaniga ahaa waxbarashadii iyo dhaqaalihii kor ayey u kaceen waayo waxaa jirtey dowlad haysato kalsoonida dadka niyada dadkuna wey fiicneyd caalamkuna soomaaliya waa u hanqal taagayey waayo soomaliya waxey ku taal meel istiraatiiji ah dunidana waagaa waxaa ka jirey loolan u dhexeya bari iyo galbeed, heshiisyo ayey doowladu gashey, mashaariic badan bey biloowday waxa kamid ah warshada canaaha ee muqdisho oo la aasasay sanadkii 1966kii iyo warshada dharka ee balcad sido kala golahi shacbaka oo la dhisay 1968dii, sido kale dugsiaga sare ee badaandir iyo hospitalka badanadir, waxa mashaariicdaas kamid ahaa dugsigsa sare ee 15ka may iyo kuwa kale oo badan, doowlado badan oo afrikaan iyo carab ah

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

soomaaliya magaalooyinkeeda ku dhex maro si xor ah isagoo aan cidi ilaalineyn tanaasulkii ku deyashada mudnaa oo uu muujiyey.

Madexwayne aadan cabdulle wuxuu geeriyodey allaha u naxariistee 2007dii waxaana heer qaran loogu aasey muqdisho waxaana kuu cadeyn karto nasiibkiisa wanaagsanaa waxey tii alle u timi waqti magaalada muqdisho doowladii c\laahi yuusuf gacanta ku heysey.

Waxaana la soo marey waqti magaalada muqdisho u kala qeybsaneyd koox koox oo aan awood loo heli laheyn in si heer qaran ah loo aaso madaxweynaha taariikhiga ahaa.

1967 waxaa xilka madaxweynaha loo dhaariyey c\rashiid cali sharmaarke wuxuuna r\wasaare u magacaabey maxamed ibrahim cigaal oo ahaa muwaadin taariikh leh tanaasul badana sameyey 1960 isagoo wax shuruud ah la gelin waqtigaas

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

madaxweynihii doorashada ku yimid, dadka soomaliyeed markaas waxey bilaabayeen in ey wax bartaan iyo in shaqooyin raadsadaan iyo iney farsamooyin bartaan niyad eyeena hayeen.

Dadku waagaa waxey ahaayeen dad xishooda, is ixtiraama dadkuna waxey u badnaayeen xoolo dhagato iyo beeraley aaminsan deegaankooda magaalooyinkana si macno dara ah uma iman jirin ilaa ay dan adag ka yeshaan.

20 oct 1969 waxaa la aasey madaxweynihii la diley halkaasna waxaa ku dhamaatey nidaamkii dastuuriga barlamaaniga ahaa ee soo socdey sagaal sanadood, maxaa ka danbeyey? waxaa ka danbeyey burburkii dimoqoraadiyada somaliya oo aan buugan ugu magac darey.

☆☆☆☆☆☆☆☆

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

ayaan ka horeyney, waayo dunidu horomarkaan tiknoolojiga ah waxey gaartey afartan kii sano oo aan caalamka ka maqneyn 1969—ilaa manta oo aan buugaan qorey 2011. intaa waxaa ugu tala galey iney dhalinta soobaxeysa iyo kuwa imaan doona in ay ka faaiideystaan

15 oct 1969 maalin arbaca ah waxaa dhacdey arin laga naxo markii la diley madaxweynihii dalka, waa maalintey bilaabantey damaca xukunka siyaasada somaliya, waa maalintii noogu danbeysey doowlad dimoqoraadiya, barlamaani ah, dastuur loo codeeyey leh, waa maalin ay baabadey rajadii soomaaliya ka laheyd dimoqoraadiyad dhab ah, waa maalintii ay baabadey ilaalin dastuur iyo doorasho xor ah, waa maalintii ugu danbeysey ganacsi xor ah oo heysta damaanad caalami ah, waa maalintii wax soo saar beeraley xor u ah beerohooda, waa maalintii ugu danbeysey dowlad heshiis caalami ah geli karta heysata codka dadka waxaa bilowdey jaahwareer siyaasadeed mar hadii la diley

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*guulo ayey ka soo hoyeen dagaalkii 1964tii
lala galey itoobiya oo waagaa aheyd
boqortooyo da weyn, laakiin shacabku kuma
fikireyn in milateriga ku jiro damac xukun,
in kastoo xiligaas socotey dabeeyl inqilaab
oo ka dhacayey afrika, taasina wey ka
baqayeen dadka indha indheya siyaasada in
ey na soo gaarto.*

*Saacado kadib arintu wey iska cadaatey 25
sarkaal oo isugu jira booliis iyo milateri
ayaa is magacaabey lana baxey golaha sare
ee kacaanka waxeyna magacoowdeen
madaxweyne in uu yahey maxamed siyaad
barre oo ahaa abaan duulihii ciidamada
xooga dalka soomaaliyeed halkaas waxaa ku
dhamaatey rajadii shacabku ey ka qabeen
dowlad barlamaani ah waxaana bilaabantey
wareegto shaqsi ah iyo koox yar oo awood
ku qabsatey taladii dalka, halki dadku ey ku
indha qaadeen talo barlamaani ah oo
lawada leyahey markii ey qaateen xoriyada
ey mudada sugayeen, hadana dadka
qaarkood waxey is lahaayeen sanad ama*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

**4-. INQILAABKII 25KII SARKAAL 21
OCT 1969.**

*21 oct 1969kii maalin talaado ah salaadii
subaxnimo waxey dadka somaaliyeed ku
indha qaadeen tangi, dabaabad, jiibab, askar
hubaysan oo wado walba taagan, dadku
milateriga waxey ku ogaayeen xerooyin iyo
xadka soomaalidu la leedahey dowladaha
jaarka ah, taasi waxey dhalisay in qof waliba
ku noqdo gurigiisa kuna boodaan
raadiyaha, dadku waxey sugayeen una
dhega taagayeen in baarlamaankooda ay
soo doorteen uu madaxweyne kale doorto
maadaama la diley madaxwereynihii hore si
dimoqoradiyado meesheedii uga sii socoto.*

*markii waagu baryey dadku waxey ogaadeen
in xildhibaanadii laga sugayey doorashada
loo taxaabey xabsiga, wadankuna galey
xaalad degdeg ah qof walbana waxa
dhacaaya indhaha ayuu ka fiirinayey waayo
shacabka wax gacantooda ku jirey ma jirin,
shacabku wuu jeclaa xoogga dalka waayo*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*aysan ka fikirin ganacsigii iyo hantidii
gaarka aheyd sida shirkado wadanka faaiido
u lahaa oo aan dib u faaleyn doono, waa
biloowgii fashilkii saraakiishii 21oct, waxey
bilaabeen in dadka lagu kulmiyo meelo
fagaarayaal ah, waqtigana looga dhumiiyo
hadalo badan oo aan natiijo laheyn lagu
shubo, dadku waxey moodayeen iney nolol
cusub gelayaan laakiin mudo yar ka dib wey
dareemeen huuhaada socota, xitaa waxaa
dhici jirtey in la yiraahdo dadka ku shaqeya
lacag la,aan waxeyna ugu yeereen iskaa wax
u qabso, waxey sii socoto markey mudo 3
sano ah joogeen oo ay wasaaradihii iyo
waliba gacantooda gashey ayaa qaar ka mid
ah waxey soo jeediyeen in xukunka lagu
celiyo shacabka ama qaabkaan wax laga
bedelo waayo meel ay wax u dhaqaaqaan
ayaa la fahmi waayey markaas ayey kala
qeybsameen intii loo arkey iney fikradaas
qabaan waa laga aamusey mudo yar ka
dibna wareegto ayaa soo baxdey taasoo ah
in wasiirro aan aheyn golaha sare oo aan
askari aheyn la keeno.*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*laba sano ka dib gacanta shacabka ayaa
lagu soo celinayaa oo doorasho baarlamaan
ayaa la sameynayaa laakiin rajadaas wey
dhici weydey.*

*Saraakiishii 21 oct is magacaabey wax
istiraajiyad siyaasadeed ah lama iman
waxey la yimaadeen huuhaa iyo anigaa iri
halkii ay ku dhaqmi lahaa yeen dastuurkii
dalka ee shacabku u codeyey oo yaaley,
taasi waxey dhalisey in wax waliba is dhex
yaacaan ilaa maantana dhibkaas uu umada
heysto, umad waliba oo meel ku wada nool
hadii aysan jirin waxey ku hisheyeen kuna
dhaqmaa illaliyaana ma suurta geleyso in
uu nidaam doowladnim shaqeyo ama jiro,
waxey iska iloobeen oo ay marnaba is
weydiin dastuurkii dalka u yaaley waxeyna
rabaan iney xakumaan shacabkii u codeeyey
dastuurka, halkaas waxaa ka bilaabatey
nidaam cusub oo eyan dadku aqoon oo ah
wareegto iyo koox kooban oo talada dalka
gacanta ku heysa halkii la arki jirey
barlamaan, waxey kaloo faraha la galeen oo*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*magacaabey golaha siyaasada markaa
waxaa bilaabatey cadaawad dhexdooda ah
mar hadii taladii 5 nin ku eekatey,
wasiirkiina uusan u shaqeyn karin si xor ah
iyo aqoontiisa waxaana la dulkeeney kuwo
ka socda xarunta siyaasada oo hal darajo ka
sareyo guulwadayaasha oo cabsan
kacaanka, markii arintaas dhacdey ayaa
waxaa bilaabantey in shaqaalihii dhexdooda
kala baqaan, shaqaalihii ahaa lafdhabarka
dowlada niyadoodii hoos ayey u dhacdey,
waxaa bilaabantey in kuwo badan oo wax u
soo bartey dalka jeclaana iney dalkooda u
shaqeyaan hadana meel ay ku nabad galaan
ayey waayeen taasina waxey dhalisey iney
shaqadii iskaga tagaan dalkana ka
dhoofaan,*

*taasi waxey dhalisey iney curyaamaan
shaqooyin badan hoosna u dhacaan ama
yaraadaan dadkii wax soo bartey intii ka
harteyna dhibkooda ayey iskaga noolayeen
dhibka shaqaalaha keliya kuma eekeyn*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*Inti laga shaki qabey wasiirnimadii waxaa
ku wareejiya la yori niman rayid ah oo
aqoonyahano ah laakiin awoodii waxaa lagu
soo koobey 5 nin oo golaha sare ah oo
talada iyaga ka godo, waxayna kala
ahaayeen,*

- 1. Maxamed siyaad bare*
- 2. Maxamed cali samatar*
- 3. Xuseen kulmiye afrax*
- 4. Ismaaciil cali abokor*
- 5. Axmed saleebaan dafle*

Shantii sarkaal ee golaha sarre ee kacaanka



*wasiiradii la magacaabey waxey noqdeen
kuwo loo meeriyo oo talada ka suga 5tii loo*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*waxaa si dhab ah u awood beeley ciidankii
booliiska oo noqdey kuwo jarta ku ciyaara
saldhiga oo aan cidi wax u dirsan halkaasna
waxaa ku dumey tiir muhiim ah oo manta la
dareemayo .*

*waxaana hadana loo dhacey abwaanadii oo
dalka u ahaa iftiin muujiya hadba markaa
wixii jiro iyo fanaaniintii oo noqdey
bartilmaameed la iska xirto, arintii halkaas
kuma joogsan waxey meel aan laga soo
noqon karin gaarsiiyeen ciidamadii xooga
dalka somaliyeed oo ay iyaga wax ku
noqdeen kana tirsanaayeen .*

*Ciidamadii xooga dalka oo lahaa qiimo
weyn qofkii doonaya in uu ka mid noqdo
wuxuu soo mari jirey nidaam u degsanaa
ciidamada, waxaana loo geli jirey safaf
dhaadheer inta ugu haboon ayaa laga
qaadan jirey, saraakiishii 21 oct waxey
gaarsiiyeen in marka la maqlo askari ayaa
la qorayaa laga cararo, markaa ayey
bilaabeen in*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*booliiska oo ahaa amaanka dalka awoodiisa
hoos ayaa loo dhigey
waxaana la sameyey ciidan ay ugu yeereen
guulwade oo qabsadey degmooyinkii oo
dhan,*

*amaankii booliiskana waxaa lagu ekeysiiyey
saldhigyada halkii awal ay habeen iyo
maalin wareegi jireen,
guulwade aan qabin tababar amni aan
aqoon xaqdhoowrka muwaadinka hadal ka
yaqaan jaale joogso dacwaan kuu qabaa
lagama yaabo inaad kala baxdaan ilaa uu
ku garto mid iyaga ka mid ah heerkaas ayaa
la gaarsiiyey qiimihii muwaadinka
soomaliyeed hadii aad ka badbaado
guulwade waxaadan ka baxsaneyn kuwo
kale oo nabadsugid ah oo iska kaa
xiranaaya maxkabad la,aan intey doonaan
xaaladaas waxey keentey iney dad badan
iska cararran iyagaoon ogeyn meel ay u
cararayaan, arintii halkaas kuma ekaan
dhibka meel kasta ayuu gaarey, waxana ey
sameyeen ciidamo kale oo ay u bixiyeen
hangash oo waxey doonaan sameyo halkaas*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

heysan, hadana dalkoodii dagaal ku jiro mey fiirin saraakiishii 21 oct laakiin wadankooda iney difaacaan ayeey go,aansadeen waxaana qeyb ka qaatey ganacsatadii shaley la xaraashey, ganacsatadii wixii baabuur lahaa iyo wixii raashin geyn karo wey ka qeyb qaateen, shacabka danyarta ah xoogooda ayeey kaga qeyb qaateen naftoodana waa ay u hureen.

waxaa kale oo xusid u baahan in saraakiishii buulka laga dhigey iyo kuwo iska xirnaa wixii loo xireyna aan shaaca laga qaadin loona maleynayey ciidan dhab ah tababaro badana qabey ayaa dagaalkii qeyb weyn ka qaatey waayo wadankii ay u dhaarteen cid ay ku haleyaan ma jirin waxeyna goosteen in ey dagaalka galaan.

Saraakishii 21 oct waxey danta ku qasabtay iney soo daayan dagaalkana toos u galaan weliba ka noqdaan hogaamiyaal.

In kastoo dadka soomaaliyeed meel kasta oo ey joogaan si wada jir ah uga qeyb qaateen

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

dadka xoog lagu soo qabto oo xeryaha sidaa lagu geeyo markaas ayaa dadka qaarkood ay lacag ku soo furan jireen eheladooda si mar uga soo baxo gacantooda, waxaa kale oo niyad jab ku dhacey saraakiishii hore oo aqoonta u lahaa ciidanimada markey arkeen waxaan ku habooneyn nidaamkii ay ku ogayeen xooga dalka soomaliyed, hadii dalkii amaankiisii guulwade la wareegey, xoogii dalkana sidaa arintiisii noqotey waxaa bilaabatey in ay isaga tagaan saraakiil badan oo wax lasoo barey,waxaana kusoo harey in yar oo rajo ku noolaa in wax is bedelaan, waxaana inta badan ciidamada ku soo harey kuwo darajada la iska siiyey oo aan ogeyn xooga dalka somaliyeed taariikhda uu lahaa.

Markey arini halkaas mareyso ayaa waxaa dhacey dagaalkii 77kii dhex marey soomaaliya iyo itoobiya oo uu markaas madaxweeyne ka ahaa keligii taliye (mingiste) dagaalkaas markuu biloowdey shacabka somaliyeed oo aan wax daryeel ah

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Markaa waxaa bilaabatey in lala hadlo taliskii 21 oct wuxuuna isku deyey in hadalkii caburiyo laakiin arintii wey ka sii xumaatey.

Waxeena ciidamada qaarkood isku deyeen inqilaab laakiin wuu fashilmey markey dhexdooda is khiyaameen, arintaasi waxey dhalisey in saraakiishii inqilaabka intooda badan la qabto lana dilo.

Arintii saraakiishii kuma eekaan waxaa biloowdey in dad kale oo shacab ah la qabto in waxyaalo aan loo baahneyn lagu sameeyo in la bara kiciyo in nolosii lagala dagaalamo, in la aaso baraagihii ay ku noolaayeen dad iyo xoolo iyo ceelashii biyaha dadku ka cabayeen, waxaa isweydiin mudan ceelasha iyo baraagihii ma inqilaabkey ku jireen!?

waxaana sii xoogeystey wixii burburin lahaa qaranimada iyo midnimida somaaliyeed waayo taliskii 21 oct markuu

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

hadana dagaalka guulo la taaban karo ayaa laga gaarey , in kastoo markii dambe wax weyn is bedeleen ka dib marki ay dagaalka soo galeen doowlado kale oo gacansaar la lahaa itoobiya sida yamanta koonfureed oo waagaa dowlad gaara aheyd, kuuba, ruushka, iyo mareykanka, waxaa la yaab noqotey rush iyo mareeykan oo waagaa ka dhexeyey loolan ayaa meel ka soo wada jeestey taasina waxey dhabarjab weyn ku noqotey taliskii 21 oct oo aan laheyn siyaasad jiheysan oo lagu aamini karo, dagaalkii dib ayaa looga soo noqdey iyadoo wax lala soo noqdey aysan jirin waxaa bilaabatey niyad jab ku yimid ciidamada iyo kuwo aan horey ciidan u aheyn oo dagaaladii la qorey markey soo noqdeen waxyeelo u geystey magaalooyin kala duwan, heykalkii ciidan waa baaba'ay waxaa bilaabatey in la adeegsado ciidamo gaar ah waxey doonaan sameeya sidii la doonana loo adeegsado.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

danbeyn wax midnimo Soomali ahna dib loo helin labada wada joogtana (wooqiye & koonfur) dab la kala dhex dhigo.

Waxey sameyeen hubkii gacanta ciidanka kala gedisan ku jirey ayey waxey gacanta u geliyeen shacabkii waxeyna kala dhex dhigeen cadaawad iyagoo adeegsanaya kuwo iyaga taabacsan laakiin dadka u sheegaaya iney ka soo hor jeedaan nidaamkii 21 oct.

Dad Soomali wanaagsan ah oo jeclaa in la daba qabto wixii ka harey qarankii bureburey wey jireen laakiin waxaa loogu jawaabey in si argagixisonimo ah loo dilo si ay tusaale ugu qaataan kuwo kale oo raja ka qabey in ladaba qabto qaranimadii. taliskii 21 oct wuxuu awoodiisa isgu geyey in uu adeegsado nidaam qabiili ah, taasina wuu ku guuleystey, waxaana magaalooyinkii ka biloowdey in dilal qorsheysan ka dhacaan ilaa dhibkii sii kordhey magaalooyin badana gacantooda

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

dalka qabsanayey laba soomaaliyeed ayeey ahayen, sadexna rajaa laga qabey jabuuti markey aragtey waxa meesha ka socda ayeey gooni isu taagtey 1977dii.

Waqooyi oo la midoobey koonfur 1960 guux ayaa ka biloowdey 1988

Markii loola dhaqmey si aan habooneeyn. taliskii 21 oct wuxuu sii fududeeyey in laga fikaro midnimadii somaaliya.

Waxaas iyaga uma aysan muuqan ,waxaa u muuqdey kursigii diyaarka ahaa oo ay ku fadhiisteen, maalinba maalinta ka danbeysa geedkii qaranimada oo ay dad badan god ugu jiraan wuu sii liicayey, taliskii 21 oct sidey maalinba laan u gooyayeen ayaa waxaa soo baxey in aysan marnaba damacsaneeyn iney amaanadii dib ugu celiyaan shacabka si boorka uga jaftaan dastuurkoodii dibna u dhistaan doowlad barlamaani ah, laakiin taliskii 21 oct wuxuu go,aansadey in aan wax qaranimu ahi ka

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya
5- KU DHAQMI LA,AANTII
DASTUURKA UMADDA.

Soomaliya markey is raacday waqooyi iyo koonfur 1960kii waxey noqotey dowlad barlamaani ah. 1961 waxaa loo codeyey dastuur.

Golahii baralamaanka 1960



Waxaan ogahey in loo baahan yahey iney jiraan wax ka dhexeya umada hishiisna ku yihiin raalina isaga yihiin, rasuulkeena scw waxa uu yiri: al muslimiina cala shuruudihim, muslimiintu waxay ku dhaqmi waxay wada galaan, dastuur macno badan ayuu leyahey laakiin waxaa xal u ah in la

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya
ka baxdey ugu danbeyn waxey socoto ay caasimadii muqdisho keliyihi gacantooda ku soo harto
ilaa markii danbe ey gaareen in madaxtooyada keliyah ay gacantooda ku soo harto, taasina kaliftey in madaxtooyadii xoog lagu galo sidaasna waa sidey rabeen waayo wax waliba gacanta ayeey ka baxeen.
Taasi waa natiijadii 21 oct in askarigii dalka loo soo taba barey mudo badan qarash badana ku baxey in wiil aan ogeyn qiimaha wadanka uu dhulka ku jiido sharafkii xooga dalka heerkaasna la gaarsiiyo.

Yaa iska leh masuuliyadaas?!

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Waxaa is weydiin leh markaad rabtid in aad hogaamiso umad waxey ku hishiyeena aad laabtid side ayaad ku hogaamineysaa ileyn ma heysatid kalsoonidii shacabka dowladina waa shacab.

Waa fashikii kowaad ee 21 oct ey galaan, xukunku waa is bedeli karaa qof kastoo soomali ah xaq waa u leyahey laakiin xaq uma lihid in aad laabto codkii dadka aadna rabtid in aad taliso, halkaas waxaa kabilowdey burburkii dimoqoraadiyada soomaaliya oo ay dad badan kasoo shaqeyeen in soomaaliya noqoto dal horomara raacana nidaamka dimoqoraadiyada, laakiin taliskii 21 oct aafadii uu ku sameyey dastuurka waa mid ilaa maanta heysata umada qof walibana uu rabo inuu wuxuu doono dadka marsiiyo.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

ilaaliyo waayo ma aha wax shaqsi si gaara u taabanayo waa wax hishiis laga wada yahey hadii uusan aheyn mid ey qoreen kooxo awood sheeganaya dadkana qasbaya kaasi dastuur ma noqonayo ee waa wareegto.

Dastuurku waa in uu yahey mid dadka raali ka yahey cod xor ahna u dhiibtey, hadii wax laga bedelanayana waxaa bedeli kara barlamaan heysta kalsoonida shacabka, dowladoo kastoo is badbadala ma taaban karaan ilaa ey u bandhigaan baarlamaanka.

Dastuur sidiisa wuxuu taabtaa meelo badan sida xuquuqda muwaadinka, sida ey ku wada shaqeeyaan maxkamada sare, xuquuda shaqaalaha, soohdimaha dalka, qeyraadka dalka, midnimida dalka, iyo hadaba wixii nidaam dowladnimo ah oo lagu hishiyo, markey talada la wareegeen taliskii 21 oct waxey laabeen dastuurkii dalku lahaa waxeyna la yimaadeen wareegto.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*xukunkana waa looga horeeyey kowdda
(1da)luulyo ayaa aheyd maalin xoriyo,
Maalin shaqsi xukun ku qabsadey
kowda(1da)luulyo lagama hoos marin karo.*

*Waa qodobkii labaad ee fashilkii 21 oct,
waxaa la yaab leh oo u baahan in la
isweydiiyo nidaam taladii dalka la wareegey
hadana ah ciidamadii dalka u dhaartey og
wixii laga soo marey xoriyada iyo
halgankeeda ,habeenkii habeenada kale ka
dheeraa, dad badan saacadu la noqotey
maalmo inta ey sugayeen si ay mar un u
arkaan iyagoo nool calan somaaliyeed oo
xor ahna ka dul babanayo dushooda, hadii
maalintaas saraakishii xukuku gacantooda
galey si fudud ku iloobaan taariikhda ey
laheydna ka soo qaadaan maalin caadi ah,
oo raadiyaha laga sheego waa nasiib xomo
weyn oo taariikhdooda wadaninimo wax u
dhimeysa.*

*Maalintii ey dadka ku qasbaayeen ee 21 oct
aawey xagee martey maxeyse aheyd.*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

**6- XURMEEYN LA,AANTII MAALINTII
XORİYADA IYO ISRAACA EE KOWDA
(1DA LUULYO)**

*1da luulyo waa maalin taariikh leh waa
maalintii xoriyada gobolada
koonfureed,waa is raacii waqooyi iyo
koonfur,waa maalin qofka somaliga ahi wax
ku noqdey, waa maalin calanka soomaaliya
laga dul taagey qaramada midoobey, waa
maalin sanooyin badan la sugayey,
waa maalin la dejiyey calankii
gumeysiga,waa malin niyada somalidu hal
aheyd, waa maalin kuwii u dhintey
mirohoodii la heley,
waa maalin mudan hanbalyo iyo
damaashaad, waa malin ka taariikh dheer
21 oct,waa maalin markhaati u ah
madaxbanaanideena.*

*marka waxaan rabaa dhalinta maanta ku
indha qaadey in 21ka oct wax waliba ka
sareyso in aan u sheego in 21 oct aheyd
maalin 25 sarkaal xukunkii la wareegeen*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Markii aan qaadaney xoriyada dadku waxey bilaabeen iney ganacsi ka shaqeystaan iyadoo wax dhib ah lagu heyn ilaa cashuurta dowlada mooyee, ganacsatadu waxey dibada la lahaayeen xiriir ganacsi oo damaanad leh, maal gashi ayey bilaabeen iyagoo shirkado caalami ah ku xiran, noloshu wey kala socotey meeshaad tagto somaliya oo dhan waxaad u baahato waad ka heleysey iyda oo sicir jaban oo macquul ah. shirkado waaweyn oo dad Somali ah ku xiran ama doowlado la galey hishiis ayaa jirey waxoodana xor u ah, qofka soomaliga ah ee awoodo waxey siin jiree n sida bangiyada deymo uu qofku wax ku qabsado in yar buu bishiina iska bixin jirey, waxaa kaloo jirey kuwo ku siinaayo qalabka beeraha ama gaari ama makiinadaha saliida sidoo kale in yar ayey bishii iska bixin jireen taasoo nolosha qofka u fududeyn jirtey in uu noloshiisa horomariyo wadankana horomariyo, waayo ganacsatadu waa lafdhabarka dalka, dalkasta oo horomara

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Waxaan la iloobi karin inta qof soomaali ihi dunida joogo waa kowda(1da)luulyo, loona baahan yahey in la xurmeyo qofkaan ogeyna waa mid aan matalin umada soomaaliyeed.

**7- LA WAREEGII HANTIDII GAARKA
AHEYD IYO BARA KICII
GANACSATADA.**

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

illaah dhul wanaagsan ugu deeqey ay dadku saf u galaan saliid baraamiil ku jirto oo nooceedu wanaagsaneyn iyo sonkor madow iyadoo wadanka ay ku taal warshada sokorta jowhar.

waxaa la gaarey in hooyada soomaliyeed salaada subax ay saf u gasho 1\2 kilo sonkor ah iyo 1\4kilo saaliid ah iyada oo ka fikireyso caruurtii iskuulka aadey waxey siin laheyd iyadoo laga yaabo iney soo weydo oo iyda oo aan wax wadan soo noqoto lacagtiina wadato waxna u goynin. dadku maskaxdooda intey ay ka fikiri lahaayen iyo howlohooda ugaarka ah waxey ka fikiri jireen subaxii iyo safkii.

Saraakiishii oct waxaa mey u muuqan waayo waxey faraha la galeen waxeyan daraasad ku sameyn la tashina kala sameyn dadka aqoonta u leh xiriirka ka dhexeya ganacsiga iyo dowladnimada, dowlad kastoo hurumar gaartay waxey ku gaartey la tashiga ganacsatada waayo tijaardu waa siyaasad laakiin siyaasadu tijaarad maaha.hadii ganacsatada xiriir wanaagsan

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

wuxuu la tashi la sameyaa ganacsatada iyadoo loo sameynayo nidaam aan wax u dhimeyn waxna aysan ku dulmeynin.

Iyada oo niyada dadku ay kor u sii kaceysey ayaa 21 oct 1969 waxaa xukunkii dalka la wareegey saraakiishii oct,waxeyna mudo yar ka dib iyagoo caga dhigan soo saareen wareegto lagu qameynayo hantida gaarka ah, iyagoo iloobey in a xoog ku yimaadeen oo aan heysan codka dadka ganacsatada iyo shirkadaha caalamka ee aaminey ayeey ku fududaadeen go,aankaas waxeyna dhalisey in ganacsato badan bara kacaan wixii hanti dibada u yaalayna ey joojiyaan taasina markiiba waxaa laga dareemey dalka dhaqaalihii iyo noloshee dadka, waxana bilaabatey in la waayo waxyaalihii daruuriga ahaa iyo in ey dadku waxa ay hore u arki jirin la kulmaan ilaa iyo waqtigii nolosho ka bilaabatey soomaaliya, waxaa la yaab noqotey sida soomaliya oo ah wadan dhinaca beeraha

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

cara guduud iyo cara cad oo mid waliba waxyaalo u gaar ah ey ka baxaan dadkuna dhulkooda iyo beerahooda xor ayey u ahaayeen qof walibana wuxuu soo saaro ayuu suuqa la tegi jirey wixii markaas uu urka iney isku bixineyso ayuu ku iibin jirey kuwo kalena intey ka iibsadaan ayey dib uga sii faaiidi jireen waana la isku dul noolaa, beeraleyda wey aaminsanaayeen dhulkooda.

Waxyaalaha qaarkood dibada ayaa loo dhoofin jirey shirkado ayaa qaadi jirey leh damaanad dowli ah wax la waayana lama arki jirin nolosha wey iska qaboobeyd. waxaa kaloo oo joogey shirkado keena qalabka beeraha oo siiya beeraleyda iyo wixii ay u baahdaan iyadoo loo fududeynayo baahidooda, isla markaana in yar in yar iskaga bixiya bishii ama markii beertu u baxdo, hadii uu ubaahdo lacag bangiga ayaa amaahin jirey waayo beertiisa ayaa damaanad u aheyd.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

lala sameyo wadanka wax badan ayeey ka qaban karaan laakiin hadii la bara kiciyo wadanku wuu bara kacayaa waa fashilkii sadexaad ee ay ku dhacaan saraakiishii 21 oct, waxeyna sababtey in shilinka somaligu uu hoos u dhaco lacagtiina qiima beesha wadan markii dhaqaalihii sareyo lacagtiisa waa sareeysaa intii ganasatada xor ahaayeen ganacsigooda 1960-1969 shilin somaligu qiima ayuu lahaa taasi waxey sababtey dhaqaalihii wadanka oo si xoowli ah hoos ugu dhacey

8- CURYAAMINTII WAX SOO SAARKA BEERAHA.

Soomaliya oo ku taal geeska afrika illaahna ugu deeqey labo webi iyo dhul beeredya kale oo ku xiran roobabka oo leh cara madow

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

guulwade galey booskii booliiska ayaa intuu ushiisa qaatey hooyadii somaliyedna saf galey u geliyey welibana ul loogu sii darey,mararka qaarkood iyadoon waxba wadan ayey soo noqotaa daalna u dheer yahey, wadan key u dhalatey soomaaliya yahey illaheyina siiyey webiyo illaah siiyey ciid aan nabaad guurin laakiin nidaam xumo ayaa timi awood aan macneheeda la aqoon ayaa timid, waxaa bilaabatey in beeraleydii soo bara kacaan magaaloyinka soo galaan saf u galaan galey jaalo ah iyagoo beertooda sadex bil ka xigto iney sugaan laakin loo awood sheegtey kuna qasabtey iney ka soo hayaamaan, saliidiisinta aheyd oo laga heli jirey albaab kasta iyadiina waa la ilaawey, waxaa kale oo shaqo la,aan ku soo baxdey oo dhibkii soo gaarey makiinadihi badarka iyo kuwii saliida

Waa fashilkii 4aad ee uu galey taliski 21 oct.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Nidaamkaas markii uu jirey dad badan ayaa u hanqal taagayey in beeraley iska noqdaan ka qeyb qaataan wax soo saarka.

Lakiin markii Ay xukunka la wareegeen taliskii 21 oct waxaa beeraleyda lagu bilaabey fara gelin iyo in la weydiiyo waxa soo gala iyo in layiraahdo anagaa kaa iibsaneyna loona sameyo heyad ka soo iibsato heyadaas iyadaa qiimeysa beertii shaqsigu lahaa waxeyna sii jireen qiime ka yar intii isaga kaga baxdey, taasina waxey dhalisey in beero badan abuurkii laga joojiyo ama ey beeran waxyaalo kale sida xabxabka taasi waxey keentey oo kale in lawaayo galey oo ay noqoto suuq madoow, sidii lagu soo gelin lahaa magaaloyinka ay noqoto wax dhib badan.

Ciidamadii kantarooladu intii ay wax kale qaban lahaayeen ayey mashquul ku noqdeen baaritaan galey taasina waxey sababtey in wadankii la keeno galey jaalo ah, jaale safka galna ay ku xigtey

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*la kulmeen soo dhaweyn iyo gacmo furan
waxaana u suura gashey iney baraan diinta
islaamka, marba kooxo culimo ah oo ka yimi
dhinaca carabta ayaa soo gaari jirey
somaaliya, waxeyna tegi jireen
magaalooyinka iyo tuulooyinka waxaana
wax ka bartey dad Somali ah oo iyagiina
bilaabey iney u faaideyaan walaalohooda
kale waxaana la gaarey in dhulka soomalida
oo dhan la gaarsiiyo, culimada soomalidana
magaalo kasta oo ay tagto waa laga soo
dhoweyn jirey, xoolona waa la siin jirey,
meel ay caruurta quraanka ku baraana waa
loo oodi jirey, macalinkaas wuxuu noqon
jirey shaqsiga ugu qiimo badan oo la sharfo,
degaankaas dadka waaweyn wey ka
faaiideysan jireen xaga su,aalaha diinta iyo
waxbarashada diinta islaamka.*

*Diinta islaamku soomaaliya waxay ka
noqotey diinta keliya ee dadku qaataan kuna
niyad furnaayeen, waagaas wax dowladihi
ma jirin dadku iyagaa diintooda ilaashan
jirey, markii meel cusub la dego waxey*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

9- FARAGELINTII DIINTA IYO DILKII CULIMADA

*Dadka soomalida waxey ahaayen dad diinta
islaamka ku soo gaartey si aan dhib badan
loo gala kulmin, culimo diinta fidisa ayaa
soo gaarey dhulka soomalidu degto waxeyna*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*wadeen saraakiisha 21 oct oo ah iney
qaateen nidaamka shuuciyada oo ay ka been
abuuri jireen.*

*Nidaamkii 21 oct waxuu soo saarey waxa uu
ku magacaabey xeerka qooyaska, taasoo lidi
ku aheyd aayada quraana oo ku jiry suurat
a-nisaa, aayada dhaxalka ee alle ku sheegay
raga & dumarka dhaxalka sida ay u kala
leeyihiin,*

*قال تعالى: يوصيكم الله في أولادكم لذكر مثل حظ الأنثيين ،
الخ الآية سورة النساء ١١*

*Arinkaas oo ay ka biya diideen qaar ka mid
ah culimada soomaaliyed inkastoo kuwo
badan hadlin hadana wey diidanaayeen iyo
shacabka oo aan gacantooda wax ku jirin
hadana hoos ka guuxayey.*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*dadku marka hore ka bilaabi jireen dugsi
quraan iyo mowlac lagu tukudo
salaada, dadkuna wax bixinta ma aheyn
amar qof waliba isagaa jeclaa in aan looga
hormarin wax bixin hadii uu heysto. markii
mudo la ahaa waxaa bilowdey halganki
gobanimadoonka culimada soomaliyeed
qeyb weyn ayey ka qaateen waayo iyagaa
ahaa isku xirka dadka iyo aqoonta waayo
wey socon jireen isgaarsiin iyagaa ahaa,
ilaa xoriyada la qaatey dadku sidaa ayey ku
socdeen, markii la qaatey xoriyada
dowladiina dhalatey arintii sidii ayey ku
wadeen culimadu waxeyna ahayeen kuwo
sidii loo ixtiraamo, qof kastoo sommali ahi
caruurtiisa markuu gaaro 5 sano wuxuu
geyn jirey dugsi quraanka laga barto.*

*Markey xukunka la wareegeen saraakiishii
21 oct waxaa bilaabatey in aan culimada
sidii hore aan lo qiimeyn isla markaana
waxaa bilaabatey faragelin iyadoo loo
adeegsanayo dad aan wax ogeyn oo
huuhaada beenta ah run moodey oo ay*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Sawirada xaqiijinaya dilkii culumada, 23kii January 1975



Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

1975tii taliskaki 21 oct wuxuu ku dhaqaaqey waxaan laga fileyn sababtoo ah dalka soomaaliya oo muslim ah iyo caalamul islaam oo dadka soomaaliya u heystey 100% muslim in hogaankii xukunka gacanta ku hayey uu arintaas sameeyo taasi waxey dhalisey arin laga xumaado kadib markii kooxo culimo ah qaarna misaajidka laga qabtey qaarna guryohooda loogu galey lana xirxirey ka dibna 10 ka mid ah ay dileen allaha u naxariistee waana shahiidiin insha allah, culumadaas waxay kala ahaayeen:

- 1: sh cali xasan warsame*
- 2: sh axmed imaan*
- 3: sh muuse yusuf*
- 4: sh axmed sh maxamed*
- 5: sh maxamed siyaad xirsi*
- 6: sh xasan ciise iley*
- 7: sh cali jaamac xirsi*
- 8: sh yasiin cilmi cawil*
- 9: sh aadan cali xirsi*
- 10: sh salabeen jamac maxamed*

**10- XIRIIRKII RUUSHKA IYO
NIDAAMKII 21 OCT.**

*Ruushka oo la isku oran jirey midowgii
sofiyeetiga waxuu ahaa dowlad ka mid ah
dowladaha quwadaha loga danbeeyo
waxeyna kuwa kale uga horeeysaa xaga
dayax gacmeedka, saldhiga laga xukumo
dayax gacmeedka ilaa hada iyadaa madax*

*Isla maalintaas taliskii 21 oct dhoolotus
ayeey sameeynayeen nidaamkii jirey
waxaana dul heehaabayey magaalada
muqdisho diyaaradaha dagaalka ilaa labo
ka mid ahi isku dhacaan eyna geeystaan
dhibaato badan iyadoo dad masaakiin ahi
ku guryo beeleen qaar kalena ku naf
waayeen, somalidu waxey tiraahdaa dab
munaafaq shidey muslim baa ku gubta.
tusaalaha maalintaas dhacey kuma waana
qaadan taliski 21 oct waxaadba moodaa
iney is yiraahdeen awoodiina wey laba
kacleeeysey laakiin arinku halkaa waa ka
weyn yahey.*

*Taariikhda lama sheegin qolo ama masuul
gala arimaha ilaaheey oo badbaada xitaa ha
qaadato mudo waa fashilkii 5aad oo ay
galaan nidaamkii 21 oct.*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

xiriirkaasi noqday mid soomalida si xoog leh oga faa'iideystaan,

Xiriirkaas wuxuu ku biloowdey si fiican laakiin is dhexgal weyn ma jirin, 1969kii markii uu wadanka la wareegey milaterigu ayaad waxaad mooda in xirir is dhexgal ah bilowdey waayo saraakiisha badan ee soomaliya ruushka ayeey wax ku soo barten, sidaa darted saaxiibo badan ayuu

ruushku ku dhex lahaa ciidamada soomaliya dhexdooda. waxaadna moodaa in 1969-1976dii

iney dowlada ruushku talo weyn ku laheyd amba hogaaminta saraakiishii 21 oct qeyb weyn ku laheyd go,aanada qaarkoodna waxaa laga yaabaa ineey iyaga lahaayen, waxey qeyb libaax ka qaateen abaarihii 1974kii oo ay dhinac walba inaka garab istaageen, laakiin ogow dowlad weyn markey ku garab istaagto hadana wey kugu maqan yihiin waxeyna la soconayaan

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

ka ah, waana dowlad qani ku ah macdanta qeybeheeda kala duwan ,waa dowlad xaga tababarka ciidanka ku sareeyso,waxey aheyd shuuciyad adag aaminsan mabda'ooda ka garab qabato dowladaha yar yar oo xiriirka dhabta ah la sameeyo xaga ciidamada iyo qalabka ciidamada si hagar la,aan ah laakiin waa markey ku ogaadaan in wax lagugu aamini karo.

Soomaliya waxey midowga sofiyet xiriir la sameeysatey sanadki 1961 lakiin xiriirku wuxuu sii xoogeystay 1964 markii dagaalki itoobiya iyo soomaiya dhexmaray xilagaas uu r/wasaare ahaa c/rashiid cali sharm'arake uu lasoo galay hishiis taabanaya dhinacya badan xaga tabarka ciidamada iyo qalabka ciidamada iyo mashraaciyo kala duwan sida mashruuci faanoole iyo horumarinta beeraha iyo waxbarashada ardayda dhameysay dugsiga sare sida cafimaadka & injineernimada iyo qeybaha kale ee waxbarasho, wuxuu

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Xaalada oo halkaa taagan ayaa 1977 waxaa biloowdey dagaalki itoobiya iyo somaliya midowga sofiyet oo dowlad weyn ahna waxey si lama filaan ah ula safteen itoobiya markaas ayaa indhohoodu furmeen saraakiishii 21 oct oo ay ogaadeen iney meel cidla ah taagan yihiin, niyad jabkii ku dhacey

wey soo kabsan waayeen waayo dhaqankooda siyaasadeed ma aheen mid la jaan qaadin kara doowlado waaweyn sida midowga sofiyeet iyo dowlado kale oo hore u marey waayo siyaasadu sida sy dad badan u qabaan maaha.

Siyaasadu ma aha been waa wax jira oo la barto oo loo maro wado sax ah, siyaasadu ma aha dowladnimo iyo madax la noqdey oo keliya siyaasadu waxey gashaa dhaqaalaha iyo arimaha bulshada oo u baahan isku xir iyo kala ilaalin, waxaan dhihi karnaa nolosha baniaadanku waa siyaasada, marka hadii uu been adeegsado qofka ganacsiga ku

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

dhaqdhaqaaqa siyaasadaada, waxeyna midowga sofiyet lahaayeen sirdoon khataro oo layiraahdo [KJB] oo halis ah, ilaa la keeno hadafkaaga dhabta ah wa lagu daba socon.

Marka saraakiishii 21 oct waxey isku dayeen iney kula dhaqmaan waxey shacabka ku hayeen huuhaa aan waxba ka jirin iyo qorshe cad oo aan laga heynin iyo iyadoo indhaha lagu hayo oo la ogaadey in hanti wadaga ay sheeganaya uusan aheyn hantiwadaag sax ah.

Waxey sheegteen hanti wadaaga cilmiga ku dhisan iyadoo dowladihii u googo,ey hanti wadaaga aysan magacaas sheegan.

Taliskii 21 oct dimoqoraadiyadii wey burburiyeen halka ay ka taagnayeen hanti wadagna waa la arkey, diinta islaamka moowqifkeey iska taageena weynu aragney.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*hadii si sax ah lola dhaqmo laga
faaiideeysan karey dhan waliba, waxaa
halkaas ku dumey tiirkii xooga dalka
soomaliyeed oo ahaa difaaca dalka oo ka
heli jirey ruushka tababar iyo qalabka
milaterigam natijada siyaasad beena loo
isticmaalo halkaas ayaa u danbeeyso.*

**10- MAXAA LAGA DHAXLEY
NIDAAMKII 21 OCT.**

*Waxaa haboon in dhalinta manta iyo kuwa
berito sawir cad laga siiyo nidaamyadii soo
marey hogaanka somaliya gaar ahaan
nidaamkii ugu waqtiga dheeraa ee 21 oct ee
ka koobnaa 25kii sarkaal*

*wixii laga dhaxley waayo nidaam kasta
dhaxal ayuu reebaa si kasta ha u dhacdee,*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*jiro ama masuul dowlad ah wuxuu
noqonayaa miraayad jabtey oo aan ku soo
noqon sidii hore wax kastoo uu sheegana
laga dhegeysan maayo lagana aaminimaayo
bulshada dhexdeeda.*

*Marka nidaam dhan oo raba in uu ku
hogaamiyo waxaan jirin iyo hadal aan wax
qabad wadan dadkiisa wuu lugoynayaa,
hadii uu isku deyo in uu dowlada kale
marsiiyo waxaan jirin waxaa u danbeyso
sidii nidaamki 21 oct dersi loo siiyey lana
gaarsiiyey meel eyan ka soo noqon xaga
siyaasada.*

*Markii uu dhacey jabkaas ayaa waxey ku
dhawaaqeen iney xiriirkii u gooyaan
dowladii ruushka iyadoo wadanku xaalad
xun ku jiro diyaarna u aheyn dowlad kale oo
buuxin karta kaalintii ruushka, taasi waxey
dowladaha jaarka oo aan is heyney u
mujisey in aan taaganahey meel cidla ah.
Nidaamkii 21 oct wuxuu noqdey mid ku
fashilmey dhinac walba wuxuuna khasirey
saaxiib weyn*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

uu yahey xiligii burburka laakiin la isma weydiin maxaa la burburiyaa oo yaaley meesha?

Maandeeq oo aan helney ama xoriyadii 1960kii ayaa nool oo calanka soomasliya ka taagan yahey qaramada midoobey laakiin waxaa la yiraahdaa qaran ma noola 1969-1991dii.

Qaranku waa dhismo kaamil ah oo mudo badan la dhisayey waxaa is weydiin leh 1991dii qaran madhisnaa waa maya ee wuu dunsanaa.

Dhismo hadii la dumiyo wixii waaweynaa laga guro waxaa soo harayo dhagxaan yar yar dhagxaantaas yar yar caruurtaa isku tuur tuurto, marka shacabkaan looga tegey rasaasta in ay isku tuur tuurayaan shaki kuma jiro waayo qaranka ayaa badbaadiya wax kasta, marka waxaan rabaa in aan faahfaahiyo dhaxalkii 21 oct anigoo mid mid u soo qaadanayo.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

taariikhduna mar kasta wey xusi wixii la soo marey xumaan iyo wanaag, wixii jireyna wey sheegeysaa, wixii xog ah ee qof qorayo isaga iyo amaanadiisa taariikhduna ma leh naceyb iyo jaceyl laakiin waxaa nasiib xumo ah in si xun loo adeegsado iyadoo la siyaasadeeynayo.

Ma haboona in dhalinta la marin habaabiyo iyagoo mustaqbalkoodu ku jiro mugdi, hadii dhibka jira si toos ah loo abaaro dhaxalkaan maanta socdo oo ay umada soomaaliyeed ku jirto sidii uu ku yimi iyo wixii sababey marka la ogaado waxaa laga yaabaa in xal la helo lana iska ilaawo wixii dhacey, tanaasuladna dhaco, lana saxo wuxuu dhibku ka taagan yahey.

Marka laga hadlayo burbur dadku inta badan waxey soo qaataan 1991dii wixii ka danbeeyey in

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*mey ku fikirin in dad badan ka faaideeysan
karaan qaladkaas oo aan rabin midnimo
laakiin fursad raadinayey.*

*Waxyalaahaas oo dhan waa qaladaadki ay
galeen saraakishii 21 oct iyagoo midnimadii
soomaliya ay gacmohooda ku dhumiyeen.*

**b) QARANKII OO AY NIDAAM XUM KU
BURBURIYEEN.**

*Qaran ma jirayo hadii aynan jirin cadaalad
iyo sharci loo hogaansamo waxyaalaha iyo
kuwo ka badan waxaa qeexo dastuurka lagu
hishiiyo sidaan hore u soo sheegey hadii la
laabo dastuurkaa waxaas oo dhan ma
shaqeynayaan waana cudurka ugu weyn ee
maanta na heysta ee wax laga wadi la, yahey
inta badan dadku 42 sano oo dastuur la, aan
ah ayeey barten qof walibana wuxuu jecel
yahey ayuu ku dhaqmaa wixii lagu hishiyey
ma tixgeliyo waa waxa nidaam dowladnimo
oo shaqeeya loo gaari la, yahey, waana wixii*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

**a) -MIDNIMADII OO KHATAR KU
JIRTA.**

*Waxaan ognahay in dadka somaliyeed
markasta ku hamiyaan in la helo shanta
soomaliyeed sadex gacan laguma heyn
hadana rajo ilaah baa og, labadii ayaa
maanta dhib ka taagan yahey sidii la isugu
keeni lahaa waayo meel halis ayeey arinta
gaarsiyeen nidaamki 21 oct.*

*Sideetamadii talaabooyinkii ay ka qaadeen
soomaliya oo dhan gaar ahaan gobolada
bartamaha iyo waqooyiga somaliya iyagoo
siyaabo kale u adeegsan karey iskana indha
tirey amaba ogeyn in midnimadu ay u
baahan tahey ilaalin badan iyo tanasul
badan, waxey moodayeen in wax waliba
xoog ku iman karaan*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*jecel yahey, niyad sami jirto midba meel ka
yimi laakiin aaminsan in uu la joogo
walaalkiis oo soomaali ah.*

*Markii nidaamkii 21 oct yimid waxey markii
hore umada ku qaldeen qabiil ayaa la
aasayaa,dadku ma aysan fahmin, markaas
ayaa waxaa bilaabatey in qofba qof loo diro
oo dadka la yiraahdo haragaagaa lagu
direy taasi waxey dhalisey in labadii guri
wada deganaa is aamini waayaan iney
dhacdey in ay indhaha la iska fiiriyo,
cadaawadii meel kasta ayeey gaartey xata
shaqaalihii dowlada oo la dhex dhigey is
aamin la,aan,ciidamadi ayeey gaartey.*

*Waxey sii socoto waxaa la gaarey in ay
dadku si isir raadsi ah isku dilaan iyadoo
laga danbeeyo markii danbese si cad ayeey
dadku u bilaabeen iney is dilaan ilaa la
gaarey wiil iyo abtigii iyo nin iyo xaaskiisii
oo is dilaayo.*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*laga dhaxley nidaamkii 21 oct. waxaa u
baahan in la ogaado lana baadi goobo sidii
loo soo celin lahaa qaranimo somaaliyeed.*

**c) -DADKII WALAALAH AHA A OO
EEY KALA DILEEN.**

*Waxaa in la xuso oo la ogaado u baahan
wixii kala diley umada isku afka ah,isku
diinta ah,isku deegaanka ah umadaha kale
kaga duwan xaga dhaqanka.*

*Somaliya 1960-1969kii waxey aheyd 8 gobol
oo runtii macquul ah,waxaana dhici jirtey 8
nin oo kasoo kala jeeda 8 gobol in ey meel
wada deganaayeen, waayo waagii hore
dadku guryo ma wada laheeyn , shaqaalaha
dowladu waxaa laga yaabaa iney isla
ijaartaan hal guri iyagoo weliba xaasas iyo
ilmo leh, nimanku galabtii banaanka guriga
ayeey ku sheekeysan jireen dumarkuna
gudaha caruurtuna wey wada cayaari jireen
iyagoo walaalo ah oo midba midka kale*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

shaqeeysa, hanata amaanka, laakiin dowladaha aan soo sheegney waxaa amaanka faraha ka bixiyey dowlado kale oo fara geliyey, laakiin inaga nidaamki somaliya ka jirey ee 21 oct ayaa sababey in hubka uu galo gacanta shacabka si kasta ha ula jeedaan

waana dhib qatartiisa leh.

**e) -GARSOOR AAN LAHEEYN
DASTUUR.**

Garsoorku waa heeyada ugu sareeysa nidaam dowladnimo ama nidaam kasta oo jira oo umada ka dhexeeya kuna hishiyeen.

Hadana garsoorku wuxuu u baahan yahey awood u gaar ah hishiiska ama dastuurka, hadii uusan jirin dastuur loo noqdo waxa imaanaayo rayi shaqsi oo an umada u dhexeeyn Karin ama awood sheegato iney goaanka leedahey.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Taasi waa natiijadii laga dhaxley nidaamkii 21 oct oo uu dadka ku kala diley isagoo ku fikirayey in aysan ka danbeeyn wax nolol ah.

**d) -HUBKI OO AY GELIYEEN
GACANTA SHACABKA.**

Sideedaba hubku waa waxyaalaha qatarta geliya amaanka umad qaran ah. Marka la rabo wadan in la baabiiyo raja xumo la geliyo aayihisa danbe waxyaalaha loo adeegsado waxaa ka mid ah hubka oo gacanta loo geliyo shacabka ama dad aan fahansaneeyn sida loo isticmaalo iyo masuuliyada uu leeyahey hubka waxaan tusaale u soo qaadan karma ciraaq iyo afgaanistaan iyo lubnaan oo kooxo hubka gacanta u galey ilaa manta la awoodi la yahey in laga helo dowlad dhab u

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

amniga tahey iyo hadey cadaalad daro ku dhacdo maxkamadu waa arin shaqsi ku kooban isagaa amaanadeeda qaadaayo.

Mar hadii sharci la raaco jiro la weymaayo shaqsi ilaaliya somalinimida waayo wey jiraan dad wadaniyiin ah oo wanaagsan oo ilaalinaayo sharafkisa iyo kan dalkiisa.

Markii talada la wareegeen saraakiishii 21 oct sidaan hore u soo sheegney weey laabeen dastuurkii qeexayey garsoorka waxeyna la yimaadeen waxay u baxsheen maxkamada badbaadada oo aan laheyn nidaam sharci ku saleysan waayo qofkii lageeyo wax baaritaan ah lagu sameeymaayo, qaren u doodana qofku ma leh.

Xeer ilaaliyaha oo barnaamij u degsan wata ayaa wuxuu rabo sheegaayo, gudoomiyuhuna sidoo kale wuu barnaamij gareeysna waxeyna xukunadoodu u badnaayeen dil ama 30 sano oo xabsi ah, waayo ruuxii loo dan leyahey ayaa la geyn

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Garsoorku wuxuu leyahey mid dowli ah iyo mid wadamada sameeystaan oo u gaar ah oo ku xusan dastuurkooda, mar kasta ama inta badan garsoorku wuu ka madax banana yahey heeyadaha kale ee dowlada, waana meesha loo noqdo hadii is khilaaf siyaasi ah ama midaan siyaasi aheyn uu dhaco go,aankana iyadaa iska leh.

Hadaba soomaliya waxey laheyd dastuur la ansaxiyey 1961dii oo qeexayo doowrka uu garsoorku ku leeyahey dastuurka iyo awooda garsoorayaasha iyo shaqadooda waxaana jirey xiligaas oo ay dowladu ku shaqeyneeysey nidaamka dimoqoraadiyada maxkamad sare iyo kuwo iyada hoos yimaada iyo xeer ilaaliyaaliyo gudoomiye iyo gudoomiyaal qeybo kala duwan, waxeyna dadka denbiyada lagu soo oogo u ogolaan jirtey qareen u dooda waxaana lailaalin jirey xurmada qofka ilaa denbiga ku cadaado hadii qalad dhaco waxaa masuuliyadeeda iska leh shaqsiga xilka hayo ee sharciga ku xad gudbo, hadey dhinaca

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Waa cudur Qatar ku ah jiritaan umad ama qaran la doonayo in uu horomaro, waana burburiye dhaqaale umadeed iyo mid dowladeedba

Sida la og yahey dowlado badan waxey la horo mari waayeen arintaan ha u badnadeen afrikaan iyo carab, arintaan waxey curyaamineeysaa kala socodka shaqada waayo shaqaalaha hadii ay arinkaan ku dhaqmaan waxey hor istaageeysaa hoowlihii nidaamiga ahaa isagoo fiirinaayo dantiisa gaarka ah oo uu ku helaayo dhaqaale aan xisaab laheeyn taasina waxey dhalineeysaa in ay shaqadii noqoto mid shaqsi gacanta ku hayo isagoo wixii lagu aaminey in uu umada uu uqabto ka dhigto wax isaga leeyahey oo ganacsi u ah wuxuuna kaaga dhigayaa wax aan la ogoleyn laakiin uu isagu adiga kuugu daneeynaayo, isagoo sameeysanaya kuwa suuqa ugu jira oo dadka iyo isaga u dhexeeya, arintaas waxey soomaliya ku soo badatey markii nidaamkii 21 oct yimid waayo nidaam aan ku dhisneeyn barlamaan

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

jirey, nidaamka dhexdiisana weey isku kala reebi jireen ninkii la rabo in baska laga tuuro waa la geeyn jirey, marka waxey aheyd maxkamad waxa nidaamku doonayo meel marsiiso. halkii uu garsoorku uu ahaan lahaa mid sharciyeeysan oo caadil ah umaduna u siman tahey waayo dadku xuquuq ayeey leyihiin xitaa marka dastuur la sameeynayo waxaa loo bandhigaa shacabka si ay u fahmaan oo u ogaadaan waxa ku qoran iyo wixii uu xuquuq ku leeyahey si gaar ah iyo si guudba sharcigaa wadanka u degsan kadibna ay doortaan waxeyna taasi ay fududeeyneeysan in loo hogaansamo sharciga.

f) -HOOWL FUDUDEEYN

Ereygaan la magac baxey howl fududeeyn marka la sheegayo sida uu u fudud yahey iyo dhibka uu xanbarsan yahey wax isku dhow maaha.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

arkeen in uu shaqada waqtigeeda imaan loona xayiran yahey saxiixisa oo marka la gaaro 10ka subasxnimo kan meesha shaqaalaha hoose ka ah oo waraaqahaaga haya ku yiraahdo iska bixi shaaha iyo tagsiga oo inta gurigiisa loogu tago laga soo saxiixo.

Waxaas oo dhib ah waxey ku dhacaysaa waa muwaadinka ay dantiisu ku xayiran tahey xaga dowlada, waxaas oo tusaale ah waxaan uga dan leyahey in waxyaalahaas aan soo xusey aan lagu deyan oo ah wax aan lagu deyan karin waayo xag diin kuma fiicna sababtoo ah waa rashwo xag wadana kuma fiicna waayo walaalkaa ayaa shaki gelineysaa muwaadinimadiisii oo wuxuu xaq u leyahey ayaad ka iibisey, marka dhalinta wadanka waa in ey ka waantoobaab dhaqankaas foosha xun oo aan ku deyeshada laheyin oo loo baahan yahey in lala dagaalamo si loo helo umad sax ah oo ilaashata sharafkooda iyo dalkooda.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

la xisaabtama dowlada ama ilaaliyo hantida qaranka, waxaa kale oo soo baxey mid arinkaas kasii xun oo ah in hantida dowlada sidii la doono loo isticmaalo, shaqsiga heysta meel dhisme ah inta uu iibsado qalabka meesha loogu tala galey, isagoo weliba adeegsanaaya gaadiidka dowlada ama wixii mashruuca loogu tala galay oo isaga aqal ku dhisto, waxyaabahaas oo dhan waa wixii laga dhaxley nidaamkii 21 oct .

Waxaa haboon iney dadku ogaadaan in dowladnimada iyaga ay leyihiin ayna xaq ku tahey iney ilaashadaan, inkasta oo jiraan kuwo u baahan in gacan bir ah lagu qabto lana baro wadanka qiimaha uu leyahey hadana waxaas oo dhan waxaa looga bixi karaa in la helo dowlad loo dhan yahey oo barlamaani ah dadkuna raali ka yahey lana xisaabtami karaan shaqsi kasta oo masuul ah, waxaa kale oo la arki jirey oo aan ku habooneyn nidaam dowladnimo in shaqsi meel masuul ka ah oo runtii dad badan

TAARIIKH NOLOLEED

Xassan xayle tooxow



g) -HIRGELINTA QORAALKA AF SOOMAALIGA.

Waxa keliya oo laga dhaxley oo dadka u faaiideyey waa ololihii af somaliga oo ay hirgeliyeen taasoo la oran karo waa talaabo fiican oo ayan dowladihii ka horeyey ayan ku guuleysan in kastoo arintaas la hadal hayey 1973dii ayaa af soomaaliga la qorey 1974dii ayaa ololaha la aadey waxaana ka qeyb qaatey ardeyda dugsiga dhexe iyo kuwa sare oo dadoodu gaareysey 16 san. Runtii qeybaha kala duwan ee wasaaradaha wey ka qeyb qaateen masuuliyadaa xoogeedase ha lahaato wasaarada waxbarashada rutii ardada guul weyn ayey soo hoyeen oo la taaban karo waxeyna ku soo dhameesteen si sharaf leh waxaana ka faaiideystey dad badan oo joogey miyiga iyo magaaladaba oo manta waxna qora waxna akhriya, waana waxa keliya oo laga soo qaadi karo nidaamkii 21 oct ee ka koobnaa 25 sarkaal.

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

muqdisho ilaah ha u naxariisto, dugsiga quraanka waxaan ka bilaabay muqidsho, kadib waxbarashada dugsiga hoose waxaan ku bilaabay dugsiga karaan, kadib [dugse] dhaxe shibis waxabarashada dugsiga sare waxaan ku dhameystay dugsiga sare 15 may 1980-21dii, kadib waxaan u soo kacitimay Saudi Arabia, kadibna waxan si koror sadey wax barasho anigoo xirir la sameyay college ku yaal magalada jeersalis ee ingiriiska, waxaan bartay dhaqalaha, wali waxaan ku noolahay Saudi Arabia, shaqooyin ii gaar ah ayaan wataa.

Qalankii

Xassan xayle tooxow,

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

Waxaan ku dhashay gobalka hiiraan magaalada baladweyne tariikhdu markay ahyed 15 julay 1960, waxay ahyed ayaamo farxadeed , maalin jimco ahna wey ahyed salaadii subaxnimo, dadkuna wali ciidii xuriyada iyo danamashaadkii ayaa u socatay iyo salaamaha, hooyadey ala ha u naxariistee waxay ku duceysan jirtay in ey I dhasho Markey ka qeyb gasho habeenki calan saarka oo ey dadka laqeybsato damashadka iyo in ey indhaeeda ku aragto calan soomaliyed oo xor ah oo la taagayo, ilaahay wuu ka aqbalay 15 cisho Markey dadka la qeybsatay farxada ayey I dhashay.

Kadib aabahay oo dowlada u shaqeynayey waxaa loo soo badalay magaalada

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

<i>Xiriirki ruushka & nidaamki 21 oct.....</i>	<i>40-42</i>
<i>Maxaa laga dhexlay nidaamki 21Oct.....</i>	<i>43-44</i>
<i>Midnimadii oo khatar ku jirta.....</i>	<i>43-44</i>
<i>Garsoor aan dastuur laheyn.....</i>	<i>45-46</i>
<i>Dadkii oo ay kala dileen.....</i>	<i>46-47</i>
<i>Hubkii oo gacanta shacabka galay.....</i>	<i>47-48</i>
<i>Howl fududeyn.....</i>	<i>49-50</i>
<i>Hirgelintii afka soomaliga.....</i>	<i>50-51</i>
<i>Tariikh nolaleed.....</i>	<i>52-53</i>
<i>Tusmada.....</i>	<i>54-55</i>

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

TUSMADA

<i>Mowduuc.....</i>	<i>Page</i>
<i>Hordhac.....</i>	<i>1-3</i>
<i>Soomaliya sidey aheyed 1943-</i>	<i>4-8</i>
<i>Somaliya sidey aheyed 1945-1960-</i>	<i>9-13</i>
<i>Israacii koonfur & waqooyi.....</i>	<i>14-20</i>
<i>Inqilaabkii 25ki sarkaal 21 oct 1969.....</i>	<i>21-28</i>
<i>Ku dhaqmid la'aanti dastuurka ummada.....</i>	<i>29-30</i>
<i>Xurmeyn la'aanti maalintii xoriyada & is raaca ee kowda luulyo.....</i>	<i>31-32</i>
<i>La wareegiin hantidii gaarka ahyed & barakicii ganacsatada.....</i>	<i>32-33</i>
<i>Curyaamintii wax soo saarka beeraha.....</i>	<i>34-35</i>
<i>Faragelintii diinta & dilki culumada.....</i>	<i>36-39</i>

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

*Ku deyda si aad midnimo &
horumar u gaartaan soomaaliyeey*

Burburkii dimoqraadiyada somaaliya

1943

